# Wax In la ogaado wanaagsantahay

Tallaabada Koowaad
Waqtiyada shaqada / Ciidaha
Sharciyada iyo Dhalashada Wadanka
Caymiska Magdhowga gaarka ah
Khamriga / Tubaakada / Maandooriyaha
Xayawaannada Guri Joogta ah
Wada noolaashaha Swiiserlaan

# Tallaabada Koowaad

Ma Gobolka Basel-Stadt ayaad hadda soo dagtay? Hadaba waa in 14 maalin gudahooda aad iskaga diiwaan gelisaa, Xafiiska Diiwaangelinta dad weynaha (Einwohneramt). Marka toos loo tago xafiiska Diiwaangelinta Dadweynaha hadii aad ku cusub tahay magaalada waxaad heli doontaa wada sheekeysi qaas ah oo salaan iyo soo dhoweyn ah xambaarsan.

## Diiwaangelinta Rasmiga ah

Dhammaan dadka soo dago Gobolka Basel-Stadt, waa in ay iska diiwaan geliyaan Xafiiska diiwaan gelinta dadweynaha ee xaafadooda (Basel, Riehen ama Bettingen) muddo 14 maalin gudahood ah.
Waxaad kasoo guurtay meel kamid ah gudaha Swiiserlaan ama waxaad ka timid wadan kamid ah wadamada Yurub (EU-Land) ama wadamada Yurub aan ku jirin balse xiriirka ganacsi ee dhow la leh (EFTA-Land):
Waxaad isku diiwaan gelin kartaa qaab qoraal ah, via E-Umzug CH ama waxaad toos u tegi kartaa Xafiiska Diiwaan gelinta Dadweynaha ee Basel-Stadt, Riehen ama Bettingen.
Kama aadan immaanin wadan kamid ah wadamada Yurub (EU-Land) ama Wadamada Yurub aan ku jirin balse xiriirka ganacsi ee dhow la leh (EFTA-Land):
Fadlan toos u kaalay Xafiiska Diiwaangelinta Dadweynaha ee ku yaallo Kundenzentrum Spiegelhof. Halkaasi waxaa lagaaga qaadi doonaa faraha iyo sawir. Is diiwaangelintu waa inaad bixisaa Lacagta adeega.
Cinwaanka Xafiiska waa kan:
Kundenzentrum Spiegelhof
Spiegelgasse 6
4001 Basel
Tel. 061 267 70 60
Maxaad u baahantahay si aad isu diiwaangeliso?
Fadlan marka hore iska soo hubi waraaqaha lagaaga baahanyahay inaad horay usoo qaadato. Warqadaha waa in ay ahaadaan kuwo ku qoran Af Jarmal, Af Faransiis, Af Talyaani ama Af Ingiriis.
Warqadahan hoos ku xusan waa kuwa qasab ah oo lagaa rabo:

- Foomka is diiwaan gelinta (Anmeldeformular). Foomkan waa inaad horey usoo buuxiso.
- Sawirka Baasaboorka ama Kaarka aqqoonsiga (dadka EU/EFTA) oo aan dhacsanayn.
- Sawirka Warqadda aad ku daggantahay guriga ijaarka ah ama guriga adiga aad

leedahay

Warqadahan hoos ku xusan waa kuwo iyagana ay macquul tahay in lagaa rabo:

- Fiisaha ama Dal ku galka
- Warqadda Qandaraaska Shaqada
- Warqadda dambi la'aanta
- Warqadda Guurka
- ama waxii kaloo loo baahdo

Hadii aad gudaha Gobolka ama meel kabaxsan Gobolka Basel-Stadt u guurto, waa inaad sidoo kale Xafiiska diiwaangelinta lasocodsiiso.
Kama aadan immaanin wadan kamid ah wadamada Yurub (EU-Land) ama Wadamada Yurub aan ku jirin balse xiriirka ganacsi ee dhow la leh (EFTA-Land) balse waxaad ku nooshahay Swiiserlaan:
Inta aadan usoo guurin Gobolka Basel-Stadt, kasoo qaado warqadda ogolaanshaha Gobolka ee ah inaad usoo wareegi karto, hay'adda socdaalka (Migrationsamt). Markaas waxii ka dambeeya ayay macquul tahay inaad is diiwangeliso.

## Kulanka soo dhoweynta

Marka aad aadid xafiiska isdiiwaangelinta, waxaa jiro kulan gaar ah. Waanu ku salaami doonnaa, waana kaaga jawaabi doonnaa su'aalahaaga waxaana sidoo kale kula wadaagi doonnaa Xog kusaabsan nolosha Basel.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/tallaabada-koowaad

# Waqtiyada shaqada / Ciidaha

Waddanka Swiiserlaan dukaamada intooda badan maalinta Axadda way xiranyihiin. Marka laga reebo goobaha ganacsi ee ku dhex yaallo Boosteejooyinka Tareenadda laga raaco iyo Goobaha Shidaalka. Maalmaha ciidaha ee aanan la shaqaynin waxaa go'aansado gobollada.

## Ciidaha

Xukunka Maalmaha Ciidaha waxuu ku xardhan yahay Xeerka shaqada Swiserlaan isagoo lamid dhigayo maalmaha Axadda. 1-da Agoosto waa maalinta qaranka Swiiserlaan (Nationalfeiertag) waana Ciid sharci ah oo wadanka oo dhan looga dabbaaldego. Ciido dheeri ah ayuu gobol walbo ku darsan karaa. Gobolka Basel-Stadt maalmahan soo socdo waxay u tahay maalmo Ciideed oo aanan la shaqayn: Sanadka Cusub (1. Janaayo), Karfreitag (Jimcaha kahorayso Ostern), Osternka, Maalinta shaqada (1-da Meey), Auffahrt (Khamiis 40 maalin kaddib Ostersonntag, Pfingsten, Maalinta qaranka (1-da Agoosto), Weihnachten (25. Diseembar), Stephanstag (26-ka Diseembar).

## Waqtiyada Dukaamadu Shaqeeyaan

Waqtiyada dukaamada lafuro ama laxiro gobollada way ku kala duwanyihiin. Gobolka Basel-Stadt dukaamada waxay furnaan karaan Isniin illaa iyo Jimce inta u dhaxayso 6-da subaxnimo illaa iyo 8-da fiidnimo. Dukaamada laakin way ku kala duwanaan karaan xilliyada ay furayaan ama ay xirayaan. Maalmaha sabtiga, dukaamada waxay xiraan xilli kahorayso maalmaha caadiga ah; badanaa 6 fiidnimo. Maalmaha Axadda Dukaamada inta badan way xiranyihiin. Marka laga reebo dukaamada ku dhex yaallo goobaha Tareenka laga raaco, Shidaallayaasha iyo dukaamada yar yar ee xaafadaha ku dhex yaallo, kuwaasoo caadi ahaan 7-da maalinba furan oo waliba inta badan Xilli horena furo xilli horena xiro si kaduwan dukaamada kale oo dhan.

## Waqtiyada shaqada Xafiisyaha Dowlada

Xafiisyada maamulka Gobolka caadi ahaan waxay furanyihiin Isniin ilaa iyo Jimco 8-da subaxnimo illaa 12-ka duhurnimo iyo 2-da duhurnimo illaa iyo 5-ta galabnimo. Xafiisyada qaar waxay furaan duhurka kadib 1:30 ka amma waxay u furanyihiin qadka taleefanka. Xilliyada ay furanyihiin Xafiisyada degmooyinka si aad ah ayay u kala duwan yihiin. Gaar ahaan Degmooyinka yaryar xafiisyadooda inta ay furanyihiin way xadidantahay. Waxaa habboon inta aadan aadin kahor inaad aaladda internetka ka fiiriso ama aad soo wacdo waqtiyada shaqada.

**Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)**

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/oeffnungszeiten--feiertage

# Sharciyada iyo Dhalashada Wadanka

Si aad Swiiserlaan u deganaato muddo dheer ama aad ka shaqaysato halkan waxa ay u baahantahay Sharci. Waxa loo kala saaraa sharciyadan Dalku Joogyo iyo Deganaasho.

## Noocyada Sharciyada

Qofka muddada uu ku suganyahay Swiiserlaan doonay inuu shaqeeysto ama inkabadan 3 bilood halkan ku nagaado, wuxuu u baahanyahay Sharci. Waxaa bixiyo sharciyada Hay'adda safarrada ee gobollada (Migrationsamt). Waxaa loo kala saara Dalku Joogyo muddo gaaban ah (ilaa 1 sano), Sharci Dalku Joog (waqtigiisu xadidanyahay) iyo Sharci Deganaasho ah (waqtigiisu xadidnayn), sidoo kale Sharciga ajaanibta xuduudaha wadankan degan ee halkan ka shaqeeyo.

- L-ka Dalku jooga kooban (Kurzaufenthaltsbewilligung L): Sharcigaan waxaa la siiyaa shaqsiyaadka muddada kooban (inta badan 1 sano), arrimo gaar ah ugu nool Swiiserlaan. Inta badan waxaa loo ogolyahay shaqsiyaadka u dhashay waddama yurub (EU-/EFTA), ee haysta Qandaraas shaqo (Arbeitsvertrag) oo ugu yaraan 3 bilood ilaa 1 sano ah.
- Sharciga Dalku jooga B (Aufenthaltsbewilligung B): Sharcigaan waxaa loo ogolyahay shaqsiyaadka loo ogolyahay inay muddo dheer joogaan Swiiserlaan. Inta badan waxaa loo ogolyahay shaqsiyaadka u dhashay waddama yurub (EU-/EFTA), ee cadayn kara inay haystaan Qandaraas shaqo (Arbeitsvertrag) oo kabadan 1 sano. Sharcigan dadka u dhashay wadamada yurub EU/EFTA waxaa la siiyaa mid ilaa 5 sano ay ku joogi karaan. Dadka wadamada kale ee adduunka u dhashay waxaa la siiyaa mid ilaa 1 hal sano lagu joogi karo. Intaas waxii kadambeyo waa in ay dalbadaan in loo cusboonaysiiyo. Si loogu cusbooneyso waxaa lagu xeri karaa dadkaan shuruudo, tusaale ahaan, inuu booqdo fasallo luqadda jarmalka ah. In laguu cusbooneysiiyo xaq uma lihid. Sababaha in laguu cusbooneysiiyo kahor imaankaro waxay noqon karaan, tusaale ahaan inaad dembiile noqoto ama noloshaada ku tiirsanaato Lacagaha Ceyrta ah. Sharcigaan waa lagaala noqon karaa haddii in kabadan 6 bilood oo xiriir ah aad dalka dibaddiisa ku maqnaato. Sidoo Kale Dalku Jooga B waxaa la siiyaa dadka loo aqoonsaday inay yihiin qaxooti.
- C-da Dal ku jooga ee aan waqtigiisu xaddidnayn (Niederlassungsbewilligung C): Sharcigaan waxaa la helaa kaddib marka aad 5 ama 10 sanadood deganaato Swiiserlaan. Sidoo kale sharcigaan way ku kala duwan yihiin helitaankiisa dadka yurub EU/EFTA u dhashay iyo dadka wadamada kale ka yimid. Haddii aad u guurto meel ka baxsan Swiiserlaan shuruudaha qaarna aad buuxiso waxaa laguu ogolyahay inaad ka maqnaato ugu badnaan 4 sanadood. Taasna waxay u baahantahay inaad codsi u gudbisato Hay'adda Socdaalka.
- F-ta dadka sida kumeel gaarka ah loo qaabilay (Vorläufige Aufnahme F): Sharcigaan waxaa helo dadka magangelyo doonka ah ee aan loo aqoonsanin inay yihiin qaxooti laakin si kumeel gaar ah loo qaabilay. Sharcigaan waa in sanad waliba dib loo cusbooneysiiyo.

## Kaarka Ajaanibta

Dadka ajaanibta ah ee ku nool waddanka Swiiserlaan waxaa la siiyaa Kaarka ajaanibta (Ausländerausweis). Nooca kaarka ee la siinaayo waxay ku xirantahay wax yaabo kala duwan. Dadka halkaan yimaado waxaa laga qaadaa faro iyo sawir waxaana lasiiyaa Kaar. Haddii Kaarkaas la xado ama uu lumo, waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo wargeliyo Booliiska. Warqadda baadi goobka ee Booliska qoreen iyo Sawirka Baasaboorka wadankaaga ama Kaarka aqoonsiga (dadka u dhashay yurub EU/EFTA) ayaad kaga dalban kartaa Hay'adda socdaalka (Migrationsamt) Kaar cusub.

## Cusbooneysiinta

Hadba nooca Dal ku joog iyo dhalashadaada ayay ku xirantahay inta u dhaxeyso muddada sharcigaaga la cusbooneysiinayo. Haddii lagama maarmaan tahay in la cusboonaysiiyo sharcigaaga, waxaa kuu imaanaya Foom la buuxinaayo (Verfallsanzeige). Foomkaan waa inaad buuxiso, maamulka meesha aad ka shaqaysana ay soo saxiixaan kaddibna aad u dirto foomka iyo sawirka baasaboorka waddankaada ama Kaarka aqqoonsiga (dadka yurub u dhashay EU/EFTA) Hay'adda Socdaalka (Migrationsamt). Haddii aad su'aalo qabto waxaa kaaga jawaabayo Hay'adda socdaalka.

## Qaadashada Caadiga ah ee Dhalashada waddanka

Haddii aad daggantahay Swiiserlaan muddo 10 sano ah, waxaad xareeysan kartaa codsiga qaadashada baasaboorka / Jinsiyada wadanka. Dadka 8 jir illaa iyo 18 sano da'dooda u dhaxeeyso waxaa loo xisaabinayaa sanadahaas ay ku noolaayeen Swiiserlaan, sanadkiiba 2 sano. Shuruudaha ugu muhiimsan ee la iska rabo inaad buuxiso waa inta sano aad ku noolayd dalka, inaad ku hadasho luqadda Jarmarlka, inaad tahay qof wadanka dhexgalay oo la qabsaday, iyo in aan deyn iyo denbi toona lagugu haysan.

## Qaadashada fudud ee Dhalashada waddanka

Qaadashada la fududeeyay ee dhalashada waddanka waxay hoos tagtaa shuruudo sharci ah kuwaasoo u ogolaanayo Qofka ajnabiga ah ee qabo Qof Swiis dhalad ah ama qof Swiis dhalad ah iyo caruurta ay dhaleen waalidiin u dhashay Swiiserlaan. Dhalasho qaadashadan la fududeeyay waxaa go'aanka bixinteeda iska leh kaliya Dowlada Federaalka ah (Bund).

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/aufenthaltstitel

# Caymiska Magdhowga gaarka ah

Waxaa habboon qof walbo inuu ku jiro Caymiska magdhowga gaarka ah. Hadii si aan ku talagal ahayn qof dhibaato u gaarsiiso, Caymiskaan waxuu kaala wareegayaa bixinta kharashaadka.

## Magdhowga Gaarka ah

Haddii qof uu dhibaateyo qof kale ama hanti qofkale leeyahay burburiyo, magta khasaarahaas waxaa laga rabaa qofkaas. Waliba hadii dhibkaas uusan u dhicin si ula kac ah. Kharashaadkaas waxay noqon karaan kuwo aad u badan. Tusaale ahaan, haddii adigoo ciyaaraha barafka (Skifahren) dheelaya aad qof dhaawacdo, waxay gaari kartaa boqollaal kun oo Faran khasaarahaas.

## Caymiska Magdhowga gaarka ah

Hadii khasaare dhaco si aan loo dhibtoon, waxaa loo baahanyahay in la samaysto caymiska magdhowga gaarka ah (Privathaftpflichtversicherung). Waxaa laga sameysan karaa inta badan Shirkadaha ceymisyada ee gaarka loo leeyahay. Ceymiskan waxaa isla samaysan karo dhammaan inta hal guri kuwada nool. Caymiska ma ahan mid waajib ah, si kastaba ahaatee waa mid aad loogu taliyo in la sameysto.

## Faaiidooyinka Caymiskan

Ceymiska magdhowga gaarka ah, waxuu bixiyaa dhibaatada dadka iyo walxaha uu u gaysto qofka caymiskaasi ku jiro. Waxaa kamid ah waxyabaha ay bixiyaan, Lacagihii dayactirka, dhaymada, mushaharaadkii ka baaqday qofka dhibta soo gaartay ama Lacagta baxnaaninta. Ceymiska magdhowga gaarka ah waxuu bixiyaa sidoo kale dhibaatooyinka ay sababeen Xayawaannada guri joogta ah qaarkood. Ma bixinayaan dhibaatada ay isu gaysteen dadka hal guri kuwada nool. Waxaa kaloo aysan bixinayn dhibaatooyinka u dhacay, ulakac ah ama mas'uuliyad xumo darteed.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/private-haftpflichtversicherung

# Khamriga / Tubaakada / Maandooriyaha

Qofkii haysta maadooriyaal, isticmaala ama beeciyo, waxuu mudanayaa ganaax. Khamriga iyo Tubaakada lagama iibin karo da'yarta.

## Maandooriyaha

Haysashada, iibinta iyo isticmaalka maandooriyaalka mamnuuca ah waa la isku ganaaxaa. Xataa haddii ay tahay wax yar oo aan badnayn. Noocyada mamnuuca ah waxay ku xusan yihiin Xeerka Walxaha Maankadooriya (Betäubungsmittelgesetz). Ka Ganacsiga maandooriyaha ganaaxyo culus ayaa la isku siiyaa.

## Khamriga iyo Tubaakada

Khamriga iyo Tubaakada waxaa laga iibin karaa kaliya da'da qaar. Sidaas darteed Gobolka Basel-Stadt cabitaanada khamriga ku milan iyo waxyaabaha tubaakada ku jirto sida sigaarka, lagama iibin karo caruurta iyo dhalinyarada ka yar 16 sano jir. Cabitaanada Khamriga badan ku jiro waxaa laga iibin karaa 18 waxii kaweyn.

## Goobaha Sigaarka lagu cabi karin

Meelaha aan la ogolayn in sigaarka lagu cabo wadanka Swiiserlaan Gobolladiisa way ku kala duwan yihiin. Gobolka Basel-Stadt isagoo cuskanaaya qodobbada xeerarka Fedeeralka ee ka hortagga Isku dul cabidda sigaarka iyo Xeerarka Gobollada ee lagu maamulo maqaaxiya ayuu mamnuucay in lagu cabo sigaarka goobahaan hoos ku xusan:

- Goobaha xiran, meelaha dadka isugu yimaadaan (Isbitaalada, Xafiisyada, Iskuullada, Madxafyada, Shineemooyinka, Masraxyada, Tareennada iyo Basaska, Dukaamada iyo Carwooyinka).
- Qolalka dad badan ay ku dhex shaqaynayaan.

In Maqaaxidaada lagu dhex cabi karo sigaar iyo inkale, waxay ku xirantahay inta ay la egtahay goobtaada. Maqaaxiyado badan ayaa leh qolal u gaar ah oo lagu cabi karo sigaarka.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/alkohol--tabak--drogen

# Xayawaannada Guri Joogta ah

Hadii aad haysato xayawaanada guri joogta ah, waa inaad ilaalisaa sharciyo dhowr ah oo kala duwan. Tusaale, Xayawaanada qaar lama ogolo in guri walbo lagu haysto. Hadii aad Eey haysato waa inaad ka diiwaangelisaa gobolka.

## Haysashada Xayawaanada

Guri kiro ah hadii aad ku nooshahay, marnaba lagaama ogolaanayo inaad ku haysato xayawaanada yaryar sida Nooc Bakaylaha u eg (Meerschweinchen), Dooliga nooca waawayn (Hamster), Shimbiraha u eg bagabaqayaha ee dhawaqa dheer (Kanarienvögel) ama Malaayga. Waxaase kaloo dhici karto in xayawaanada waawayn (Xataa Bisadaha iyo Eyaha) Qandaraaska Kirada Guriga ay ku qornaan karto in aan lagu haysan karin guriga. Xayawaanada dhawaqa dhaadheer sameeyo ama halista ah, qofka kaa kireynayo guriga waxuu xaq u leeyahay inuu ku yiraahdo waaka mamnuuc gurigaan. Si kastaba ha ahaatee dadka haysto xayawaanadan waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaal Xeerarka Xanaanada Xayawaanka. Tusaale ahaan Xeerarkaas waxaa ku qoran in xayawaanada qaar sida hal bakaylaha aan kaligiis meel lagu hayn karin oo wehel u baahanyahay. Waxaa jiro sidookale cabbir go'an oo lagaa rabo inuu la ekaado godka ama meesha aad dajinayso. Xayawaanno badan sida shabeelka ayaan loo ogolayn in wadanka Swiiserlaan lasoo galiyo ama aad ogolaansho qaas ah kasoo qaadato Hay'adda Xanaanada Xoolaha (Veterinäramtes).

## Eeyaha

Gobolka Basel-Stadt waxaa ka jiro xeerar u gaar ah Eeyaha. Waajibaadka saaran dadka haysto Eeyaha ayaa ku xusan xeerarkaas. Macluumaad dheeraad ahna waxaa kula wadaagi karo Dhaqtarka ama Dhaqtarada xayawaanka.

- Eeyaha Swiiserlaan oo dhan waa in qalab yar lagu dhex beero jirkooda, kaaso ay ku xafidsanyihiin macluumaadkiisa. Eeyga waxa la siinayaa Sharciga Teesaraha eeyaha oo laf ah (Kreditkartenformat). Teesarahan lama mid ah midka buluuga ah ee wadamada midowga yurub ee adigoo Eeygaada wato aad la safri karto.
- Eeyaha waxaa qasab ah in laga diiwaangeliyo Gobolka ay ku noolyihiin. Bogga aaladda internetka ayaad ka buuxin kartaa foomka (Onlineformular). Sanadwalbo Eeyaha waxaa laga qaadaa Canshuur. Si aad u haysato Eey waxaa waajib ah inaad ku jirto Caymiska Magdhowga (Haftpflichtversicherung).
- Qof walba oo Eey iskaleh waa inuu meel walboo Eygaasi ku saxaroodo isla markaasi qaado oo ku qubo meelaha loogu tala galay. Haddii aadan samaynin sidaas Askarta ayaa kugu ganaaxi karta.
- Eeyaha qaar (sida Putbull-ka iyo Rottweiler-ka) si aad u haysato waxaad u baahantahay inaad hesho ogolaansho qaas ah.
- Goobaha lagu nasto ee faras magaalaha (Park) iyo meelaha carruurta lagu ciyaarsiiyo waaka mamnuuc in Eeyaha galaan. Jiyeehaya "Mapserver" ka ee Gobolka waxaad kaheli kartaa goobaha loo ogolyahay in ay eeyaha ku luga baxsadaan iyo meelaha ay ku dabaashaan.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/haustiere

# Wada noolaashaha Swiiserlaan

Waddan walbo waxa uu leeyahay dhaqammadiisa u gaarka ah. Sidaaso kale Swiiska waxaa jiro qaab dhaqameed ay habboon tahay inaad wax ka ogaato.

## Dhaqammada kala duwan

Swiiserlaan waxaa ka jiro dhaqammo iyo hab fikir kala duwan. Tani waxay sidoo kale ku lug leedahay afarta luqqad ee rasmiga ah wadanka looga hadlo. Wax caadi ka ah gobollada luqada Jarmalka looga hadlo ayaa dhici karto gobollada afka Faransiiska looga hadlo inay si kale u arkaan. Farqiga u dhaxeeyo magaalooyinka iyo baadiyaha ayaa isna noqon kara mid weyn. Si kastaba ha ahaatee waxaa jiro dhaqammo dadka Swiiserlaan oo dhan ay ka simanyihiin.

## Salaanta

Markaan joogno Swiiserlaan waxaan isku salaannaa sidaan: Gacanta ayaan isku salaanaa innagoo indhaha iska eegayno. Xataa Ragga iyo Dumarka markay isa salaamayaan indhaha ayay iska eegaan. Innaga Reer Basel ahaan waxaan dhahnaa Giridssi "Griezi". Dadka sida fiican isu yaqqaano waxay is dhahaan Saali "Sali" ama Hooy (Hoi). Dadka baadiyaha ku nool way isku salaammaan waddooyinka xataa haddii aysan is aqqoon.
Xushmadda aad ayay muhiim uga tahay Swiiserlaan. Sidaas awgeed ayaan inta badan isu dhahnaa Mahadsanid "Danke" iyo Adaa mudan "Bitte". Tusaale ahaan, dukaamada ama maqaaxiyadaha waxaan marar badan is dhahnaaa "Danke" iyo "Bitte" oo ah Mahadsanid iyo Soo dhowow (Adaa mudan).

## Inaad Waqtiga ilaaliso

Waddanka Swiiserlaan ilaalinta waqtiga aad ayay muhiim u tahay, qaasatan goobaha shaqada. Haddii aad in kabadan 5 daqiiqo soo daahayso, fadlan waqti hore sii wargeli meesha aad ballanta ku lahayd. Qof ayaad rabtaa inaad la kulanto soo ma ahan? Hadaba waa inaad ballan lasii dhigataa kulanka kahor.

## Xiriir Maldahan

Reer Swiiserlaan hadaanu nahay, dhaliisha indhaha iskama saarno inta badan. Qaab maldahan ayaan isugu sheegnaa badanaa. Si kastaba ha noqotee waxaan ka rajaynaa dadka kale inay yihiin kuwa fahmi kara dhaliisha. Haddii aadan wali ku hadlin af Jarmal fiican culees gaar ah ayay kugu noqonaysaa.
Sidoo kale waxaan isaga fogaana marar badan Khilaafyada. Tusaale ahaan deriskaada ayaa wax kaa dhibsaday soo ma ahan? Waxaa laga yaabaa inay toos kuugu imaanin ee ay warqad kuusoo qoraan. Ma hubtid sooma ahan waxa ku qoran warqadda inaad si fiican u fahantay? Hadaba waxaa fiican inaad waydiiso markale waxii aadan fahmin.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/gut-zu-wissen/wada-noolaashaha-swiiserlaan